

PERTUSSIS



(XIIQ-DHEERTA)

Naftaada Ilaali, Qoyskaaga Ilaali

WAA MAXAY PERTUSSIS?

Pertussis (xiiq- dheertu) waa cudur aad u faafa oo ku dhaca hawo mareenka, kaasi oo ay keento bakteeriya laga helo afka, sanko, iyo dhuunta qofka xanuunka qaaday. Khatar ayuu noqon karaa, xataa wuxuu xanuun naftooda halis galiya u keeni kartaa ubadka da'doodu ka yar tahay 12 bilood, gaar ahaan kuwa markaasi dhasha, kuwaasi oo yeesha khatarka ugu wayn ee xaaladdo adag oo caafimaad oo soo food saara sida cudurka sanbabka ku dhaca ee loo yaqaan pneumonia, neefsashada oo aad ugu adkaata, suuxdin ku timaada , iyo isagoo xataa keena dhimasho.

Xiiq-dheerta waxaa la iskugu gudbiyaa marka xiriir toos ah lala sameeyo dheecaan qoyan oo sanko iyo dhuunta ka yimaada iyo jeermis hawada la socda. **Tallaalku waa habka ugu wixtarka badan ee looga hortago faafida xanuunkan.** Daawooyinka infekshanka la dagaalama ayaa loo isticmaali karaa ina lagu daaweeyo dadka xanuunka qaaday.

Haddii uu ilmahaaga laga helay xiiq-dheerta, isaga ama ayadu waxaa laga waydiisan doonaa inay guriga joogaan oo aanay dugsiga aadin ilaa shan maalmood si daawada infekshanka la dagaalantaa ay u noqoto mid wax tari karta.

CALAAMADHA LAGU YAQAANO

- Xiiq-dheertu sida caadiga ah waxay bilaabataa iyadoo leh calaamadaha hargabka iyada oo ay soo raacdo hal ilaa laba toddobaad oo la yeesho qufac joogta ah iyo/ama qufac aad u daran oo socon kara toddobaadyo ilaa muddo bilo ah.
- Marka uu qufacu, bilaabmo, waxaa suurta gal ah in caruurta uu matag qabto, si adag u neefsadaan ama si xoog ah neefta u qaataan, iyagoo samaynaya qufac aad u dheer. Tani waxaa laga yaabaa inay soo raacdo xunqaaco ama daal ay dareemaan.
- Qandhadu sida caadiga ah maaha mid jirta ama waa yar tahay.

MACLUUMAADKA TALLAALKA

Inkastoo ay suurta gal tahay in aad qaado xanuunka xiiq-dheerta xataa haddii aad qaadato dhamaan tallaaladii loo baahnaa, **in sidaasi oo kale xaalkoodu noqdaa AAD AYAY U YAR TAHAY kuwa la socda ee SIDII LA RABAY U QAATA tallaaladooda xiiq-dheerta.**

- Caruurta heshay dhamaan qiyaastii tallaalada afarta ahaa ee DTaP ka hor sannad guurada afarraad ee dhalashadooda waa inay helaan qiyaas shannaad oo ah tallaalka DTaP (ilaa ay lix jir ka noqonayaan).
- Qofkasta oo da'diisu u dhaxayso 7-10 jir ee AAN si buuxda looga tallaalin xanuunka pertussis waa inay hada helaan tallaalka Tdap.
- Qofkasta oo 11 jir ah ama ka wayn ee aanan wali qaadan tallaalka Tdap waa inay hada helaan.
- Haweenka uurka leh waa inay la tashadaan daryeel bixiyahooda gaarka ah sidii ay u heli lahaayeen tallaalka Tdap.

AYAY TAHAY IN LA WACO

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan pertussis ama tallaalka, wac daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama Caafimaadka Bulshada Degaanka Multnomah **503-988-3406**.